



Rasuulka Ilaahay scw waxaa lagu soo dajiyey waxyiga isagoo afartan jir ah

Cabdullaahi Binu Cabaas Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiiba wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw waxaa lagu soo dajiyey waxyiga isagoo afartan jir ah, wuxuu joogay Makkah sadex iyo tobani sano, ka dib waxaa lafaray inuu ka hijroodo, wuxuuna u haajiray Madiina, wuxuu joogay Madiina tobani sano, ka dibna Ilaahay ayaa oofsaday. scw.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Ibnu Cabbaas Allaha ka rali ahaado isaga iyo aabihiye wuxuu sheegay in waxyiga lagu soo dajiyey Nabigha scw oo la soo diray isagoo afartan jir ah, Makkana uu joogay saddex iyo tobani sano waxyiga ka dib, ka dibna waxaa la amray inuu madiina u haajiro, iyadana wuxuu joogay tobani sano, ka dibna uu geeriyyoday scw isagoo da'adiisu tahay saddex iyo lixdan sano.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65050>

